



Federal Republic of Somalia
Galmudug State
The Supreme Court of Galmudug

TIRSI. MSDGGM//20

Tar. 19/ 10 /2020

UJEEDDO: Baahin shaqo garsooranimo.

Maxkamada Sare Ee Dowlad Goboleedka Galmudug

Nuuca Shaqada: Garsoorayaal

Goobta Shaqada: Maxkamadaha Darajada Koobaad , Darajada Labaad ,Iyo Darajada Sadaxaad

Tirada Shaqooyinka Banaan 16 Garsoore

Hordhac:

Garsoorku waa hay'ad u xilsaaran ilaalinta, isku xukunka iyo ku dhaqanka sharciga, dhawrista xuquuqda aadanaha, xalinta cabashooyinka u dhaxeeya dadweynaha ama muwaadiniinta iyo hay'adaha dawliga ah, sidoo kale garsoorku wuxuu u xilsaaranyay ciqaabta iyo anshax marinta dambiiyaasha. Taas macnaheedu waa in garsoorku masuul ka yahay guud ahaan Caddaaladda Deegaanada Galmudug .

Garsoorku waxaa uu u taaganyahay u adeegidda muwaadiniinta iyo dadka kale ee daggan Galmudug , isagoo ka shaqeeya sidii ay u heli lahaayeen adeeg caddaaladeed oo ay aasaas u tahay eex la'aan, fulinayanna adeegayaal daacad ah, ammaano leh, karti iyo hufnaan leh, shaqo yaqaan ah aqoonna u leh shaqada ay qabanayaan.

Si haddaba loo xaqiijiyo ujeeddada garsoorku u taaganyahay ee sare ku xusan loona haqab tiro baahida ka jirta maxkamadaha darajada koowaad ,darajada labaad iyo darajada sadaxaad ee Dowlad Goboleedka Galmudug.

Waajibaadka Garsooraha:

U gudashada shaqada garsooranimo si ay ku jirto, hufnaan, madax banaani, dhexdhexaadnimo, howlkarnimo, sinaan iyo caddaalad.

U hogaansanaanta, dabaqidda iyo ilaalinta sharciga mar walba iyo xaalad walba.

Socodsiinta, Maamulidda dhegeysiga, ka garnaqidda iyo Go'aan ka gaarista, Dacwadaha si waafaqsan sharciga.

Xaqiijinta in dhinacyadu helaan fursado isku mid ah maxkamadda horteeda.

Qiimeynta iyo Go'aan ka gaadhista cadeymaha maxkamadda la horkeeno.

Samaynta cilmi baadhiso ballaaran oo la xidhiidha dacwadaha horyaala garsooraha iyo sharciyada.

U socodsiinta dacwadaha si aan daahis laheyn.

Ugu adeegidda bulshada si ay ku jirto danta caddaaladda oo kaliya.

Shuruudaha Qofka Garsooraha Loo Qaadanaayo:

Waa in uu Soomaali yahay, kana soo jeedo deegaanada Dowlad Goboleedka Galmudug dhimirkiisu dhan yahay, aan dambi maxkamad xukuntay galin isla markaana da'diisu ka yareyn 25 sano

Waa in uu shahaado ka heysto Jaamacad la aqoonsan yahay, oo dhanka sharci ga ah [Shareecada iyo Qaanuunka].

Waa in uu leeyahay ugu yaraan khibrad hal sano ah oo la xidhiidha hawlaha sharci.

Waa in uu leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan;

Waa Inuu Aqoon fiican u leeyahay adeegsiga aaladda Computerka.

Waa in uu leeyahay xirfadda lagu xaliyo qilaafaadka.

Waa in uu qori karo kuna hadli karo luqadaha [Afsoomaali, carabi iyo ingiris] laba kamid ah

Waa in uu diyaar u yahay in uu ka shaqeeyo goob kastoo Galmudug kamid ah

Sida loo soo codsanaayo shaqadaan:

Qofka danaynaya shaqadaan waxa uu ku soo diri karaa codsiyigiisa shaqo, macluumaadka Taariikh nololeedkiisa [CV] iyo nuqul kamid ah shahaadooyinkiisa jaamacadeed, E-mailkaan info@supremecourt.gm.so.

Taariikhda araaji Qabashada wexey bilaabaneysaa : 20/10/2020

Taariikhda qabashada codsiyadu wexey ku egtahay : 30/10/2020

Shaqo wacan